Reach-Up
Head Start
Early Head Start

# Buug-gacameedka Waalidka 2026-2027



350 Hwy 10 S Suite 100
St. Cloud, MN 56304

www.reachupinc.org

Telefoon: 320-253-8110
Fakis: 320-253-1107

@reachupheadstart

Reach-Up Head Start

# TUSMO


Hadaf, Aragti, Qiyamka..................................1
Heerarka Anshaxa....................................2-3
Barnaamijyada Reach-Up Head Start.............4
Su'aalo? cida la wacaayo...............................5
Tilmaamaha Gaadiidka...............................6-7
Xaadirida....................................................6-7
Waxbarashada Daryeelaha/Shirarka/
Iskaashiga Qoyska.........................................8
Gollaha Siyaasada.........................................8
Fursadaha hoggaaminta waalidaka................8
Dabaaldegyada..............................................9
Xayawaanka Fasalka.....................................9
Shirarka iyo Booqashada Guriga....................9
Baaritaano.....................................................9
ku Ciyaarida Banaanka..................................9
Hawada Xun.................................................10
Fursado waxbarasho oo Dadka Waaweyn....10
Illaha Maktabada.........................................11
Korniinka Qibradeysan oo Tababar leh.........11
Caafimaadka................................................12
Caafimaadka Dhimirka/Habdhaqanka...........13
Adeega Naafada..........................................13
Adeegyada Kalaguurka Xanaanada.............14
Nafaqo..................................................................15
Naasnuujin...........................................................15
Hadafyada U Diyaar garowga Iskuulka...................16
Helitaanka............................................................16
Warbixinta Xadgudubka Caruurta ..........................17
Qarsoodi...............................................................17
Deegaanka...........................................................17
Dowladnimo..........................................................17
Howlaha Qoyska...................................................18
Barnaamijka ka qeyb qaadashada Qoyska............18
Howlaha ka qeybgalka Qoyska.............................19
Soo wicida Macalimiinta.........................................20
Tababarida Musqusha...........................................20
Nidaamka Taburucaada.........................................20
Shuruucada Sawir-qaadista iyo Muuqaal Duubista ee
Waalidiinta, Xubnaha Qoyska, iyo Martida..............21
Habka Cabashada..................................................21
ka saarida carruurta jiran iyo imaanshaha
Caruurta Xanuunsan.............................................22
Reebista Caruurta jiran iyo imaanshaha.................22
Gargaarka Degdega.........................................23-26
Taageerida Qoyska iyo Qayraadka Bulshada ...27-30

# Soo dhowaada Qoysaska

**WAXEYNU RAJEYNEYNAA INEYNU ISLA KORNO ADIGA IYO ILMAHAAGA SANADKAN!**

## Hadafkeena

Reach-Up Head Start and Early Head Start waxey bixiyaan waxbarasho dhameystiran iyo adeegyo caawinaad taasoo diirada saareysa dhalaanka iyo qoysaskooda kuwaasoo dakhligoodu hooseeyo.

## Aragtideena

Reach-Up Head Start iyo Early Head Start waxaa looga aqoonsan yahey bulshada dhexdeeda iyo gobolkaba in ay Qoysaska xooga saarto sida caruurnimada hore taasoo ah qaab horumarsan oo aad u sareysa kuna yeelato saameyn weyn oo waarta.

## Qiyamkayaga

- Dhamaan cilaaqaadka la xiriira sida sharafta, aaminaada, ixtiraamka.
- Iskaashigeena Waxeynu xooga ku saarnaa caruurta, Qoysaska, iyo wakaaladaha bulshada.
- Gaar u ahaanshaha iyo kala duwanaanta bulshada dhexdeeda.

# HEERARKA ANSHAXA

**REACH-UP WAXEY KA FILAYSAA HAB-DHAQAN HEER SARE AH DHAMMAAN SHAQAALAHA, LA-TALIYAYAASHA, QANDARAASLAYAASHA, IYO MUTADAWICIINTA MARKA AY LA SHAQEEYAAN QOYSASKA, CARRUURTA IYO BULSHADA.**

**SHAQAALAHA, LA-TALIYAYAASHA, QANDARAASLAYAASHA, IYO MUTADAWICIINTA INEY KU SHAQEEYAAN MATALAANA RABITAANKA REACH-UP:**
**LA-TALIYE- QOFKA BIXIYA TALADA KHABIIRKA AH**

**QANDARAASLE- A PERSON OR COMPANY THAT UNDERTAKES A CONTRACT TO PROVIDE MATERIALS OR LABOR TO PERFORM A SERVICE OR DO A JOB.**

**MUTADAWAC-QOFKA SI XOR AH WAQTI BILAASH AH U SIIYO HAY'AD.**

1. KOR U QAAD OO HIRGELI BAYAANKA HADAFKA IYO QIYAMKA ASAASIGA AH EE REACH-UP

2 IXTIRAAM OO KOR U QAAD AQOONSIGA GAARKA AH EE ILMO KASTA IYO QOYS KASTA OO KA FOGOW KU-TAKRI-FALKA KU SALAYSAN, JINSIGA, QOWMIYADDA, DHAQANKA, DIINTA, NOOCA GALMADA, NAAFANIMADA AMA KA KOOBAN QOYSKA.

3.WAXAA LOOGA BAAHAN YAHAY SHAQAALAHA, LA TALIYAYAASHA, QANDARAASLAYAASHA, IYO MUTADAWICIINTA INAY U HOGGAANSAMAAN SHARCIYADA ILAALIYAANA XOGGAHA BARNAAMIJKA KHUSEEYA MACLUUMAADKA SHAKHSI AHAAN LAGU AQOONSAN KARO EE KU SAABSAN CARRUURTA, QOYSASKA, IYO XUBNAHA KALE EE SHAQAALAHA SI WAAFAQSAN HEERARKA WAXQABADKA IYO SHARCIYADA FEDERAALKA, GOBOLKA, IYO DEEGAANKA.

4. HA KA TAGIN ILMO KELIGIIS AH AMA AAN LA ILAALIN INTA AY DARYEELAYAAN. REACH-UP WAXAY ISTICMAASHAA HAB KORMEERKA FIRFIRCOON.

5. ISTICMAALKA HABAB WANAAGSAN OO HAGITAAN CARUUREED LEH, ISLA MARKAANA KUMA LUG YEELAN DOONAAN ARIMAHA HOOS KU QORAN;
• CIQAAB JIREED;
• IN ILMAHA LAGU EDBIYO GO'DOOMIN;
• IN ILMAHA MEEL LAGU XIRO SI UUSAN U DHAQDHAQAAQIN AMA AFKA KOOLO LOOGA XIRO;
•IN LAGU IQAABO CUNTADOO LOO DIIDO AMA LAGU QASBO AMA ABAALMARIN LOOGA DHIGO;
• IN MARKA LA BARAYO HABABKA ISTICMAALKA MUSQUSHA EE CIQAABAYA, HOOS U DHIGAYA, AMA CEEBAYNAYA ILMAHA;
•ISTICMAALKA NOOC KASTA OO XADGUDUB SHUCUUREED, OO AY KU JIRAAN BAHDILID DADWEYNE AMA MID GAAR AH, DIIDMO
ARGAGIXINTA, ISKA INDHATIRIDDA DHEERAADK AH, AMA MUSUQMAASUQIDA ILMAHA
• ILMAHA JIR DIL U GEYSTA
• ISTICMAALKA NOOC KASTA OO AFLAGAADO AH, OO AY KU JIRAAN AF-LAGAADO, HADAL JEESJEES AH, HANJABAAD, AMA HADALLO DEELQAAF AH OO KU SAABSAN ILMAHA AMA QOYSKA; AMA
• U ISTICMAALA DHAQDHAQAAQA JIRKA AMA WAKHTIGA DIBADDA CIQAAB AMA ABAAL MARIN AHAAN.

6.SHAQAALUHU WAXAY RAACAAN DHAMMAAN SHARCIYADA HAY'ADDA IYO HABRAACYADA MARKA AY MATALAYAAN REACH-UP.

7. XUBNAHA SHAQAALAHA WAXAA LAGA FILAYAA INAY SOO BANDHIGAAN MUUQAAL XIRFADEED OO AY U DHAQMAAN SI XIRFAD LEH INTA LAGU JIRO DHAMMAAN SAACADAHA SHAQADA. TAN WAXAA KU JIRA KA QAYBGALKA SHIRARKA ZOOM AMA GOOBO KALE OO LA MID AH OO AY KA MID YIHIIN WAXYAABAHA LAGA FILAYO, LAAKIIN AAN KU XADDIDNAYN:
LABBISKU HA AHAADO "GANACSI CAADI AH"
• KAMARADA/FIDYAWYADA WAA IN AY "SHIDAN YIHIIN" IYO MAQALKANA "DANSAN YAHEY"
YAYSAN JIRIN DAD- KALE OO KA AG DHOW AGAGAARKA - YAYSAN JIRIN DAD KALE OO ARKO AMA LA HADLO
• U FIIRSO KULANKA—YAYSAN JIRIN HAWLO KALE, HA ISTICMAALIN TALEEFANKA GACANTA

8. SHAQAALAHA WAXEY ISUDUWAHA HR U SOO GUDBIN DOONAAN DHAMAAN DHAQDHAQAAQA DAQLI OO AANAN HABOONEYN. XOGTAAN WAXEYNU ULA MACAAMILI DOONAA SI SIR AH IYO INEYNU KA DHOWRNO WIXII SI QALDAN LOO SOO GUDBIYO.

**Anshaxa soo socda waa ka mamnuuc Shaqaalaha:**

1. in lagu shaqeeyo khamriga iyo/ama daroogooyinka sharci darrada ah iyo maandooriyaha ama isticmaalka, iibinta, bixinta, ama haysashada aalkolada iyo/ama daroogooyinka sharci darrada ah iyo maandooriyaha in lagu dhex isticmaalo hantida reach-up.

2. Ka tagista ilmo kasta iyada oo aan la ilaalinayn inta ay ku hoos jiraan daryeelka.

3. Ku lug lanhaansho kasto oo xadgudub galmo ah oo loogeysto caruurta, ama dayacaad ah soo gudbi wixii laga shakisan yahay oo ku saabsan ku xadgudubka caruurta iyo/ama ku saabsan in si xun loola dhaqmo ilmaha.

4. Haysashada hubka ama hubka kale in lagu dhex isticmaalo hantida Reach-Up ama inta lagu jiro koorsada iyo baaxadda shaqada.

5. Caawinta ama diidmada shaqaaluhu inuu raaco tilmaamaha maamulka ee ku saabsan arrin shaqada la xiriirta.

6. Dagaal ama weerar ka dhex dhaco shaqaalaha dhexdiisa ama macmiilka.

7. Xatooyo, burburin, magac-xumo, ama si xun u isticmaalka hantida reach-up ama hantida shaqaale kale.

8. Been abuurista ama bedelida diiwaanka reach-up ama warbixin kasta, sida codsi shaqo, codsi isdiiwaangelin, warbixin caafimaad, wakhtiga shaqada, iwm.

9. Hanjabaadda ama cagajuglaynta maamulka ama shaqaalaha la shaqeeya.

10. Ku guuldareysiga in sharciga iyo badqabka uhogaamsamaan.

11.Ku kug yeelashada nooc kasto oo galmo ah.

12. Faafinta aan habooneyn ee macluumaadka sirta ah.

13. si ula kac ah inaad macluumaad qaldan bixiso taasoo ku saabasn u diiwaangelinta qoyska barnaamijka.

Tusaalooyinka kor ku xusan waxey xog tusaaleyneysaa noocyada habdhaqanada aan la ogoleyn, laakiin aanan intaas ku koobneyn .Dhaqan aan habboonayn wuxuu keeni karaa in qofka ku lugta leh laga qaado tallaabo ciqaabeed, taasoo gaari karta in shaqada laga eryo.

# BARNAAMIJYADEENA




**REACH-UP HEAD START ADEEGA BARNAAMIJYADA AY BIXISO WAA 87 DHALAANKA YAR YAR (EHS) IYO 275 OO ILMAHA XANAANADA DHIGTO(HS) WAXEYNU KA HOWLGALNAA DEGMOOYINKA KALA AH BENTON, SHERBURNE AND STEARNS.**

## QOYSASKA LAGA YAABAA INEY U QALMAAN EARLY HEAD START IYO HEAD START HADII AY...

- Hoyla'aan yihiin
- Daqligooduna yahey intii ay federaalka jaangoysey
- Qaataan MFIP,SSI ama laga caawiyo cuntada(SNAP)
- Qaataan deeqda daryeelaha Qaraabada
- U buuxi naayaan ilmo naafo ah hestana dikomindiyo ama heysto Baahi gaar ah, adeegyadaasoo ay ka midyihiin in Ilmaha laga caawiyo hadalka, IEP ama IFSP iyo wixii lamid ah.

## EARLY HEAD START

Bilowga hore Howlihiisa wuxuu bixiyaa sanadkii oo dhan howlahaas oo la siiyo Ilmaha da'doodu u dhaxeyso markey dhashaan ilaa 3 jir iyo Adeegyada hooyada uurka leh

**Barnaamijyada imaanshaha Guruga**
waxaa la bixiyaa sanadkii oo dhan isbuucii 90 daqiiqadood, booqashada gurga iyo isdhaxgalka bulshada oo la qabto bishii 2 mar iyadoo howlo si koox kooxeysi ah loo sameynayo

**Early Head Start Xarunta Daryeelka Caruurta**
waxey bixisaa Adeegyada Ilmaha yaryar iyo xanaaneynta Ilmaha. Sanadkoo dhan, 5 beri isbuucii.

**SI AAD U DALBATO, SOO WAC 320-253-8110 AMA BOOQO REACHUPINC.ORG**

## HEAD START

waxey Ilmaha da'doodu u dhaxeyso 3 jir ilaa 5 jir u diyaarisaa xanaanada.

**Goobaha xarunta ku saleysan**
fasaladeeda waxaa la bixiyaa 4 maalmood isbuucii laga bilaabo Agoosto ilaa Juun.

- Big Lake
- St. Cloud
- St. Cloud Technical College

**Head Start Xarunta Darryeelka Caruurta**
waxey bixisaa Adeegyada Ilmaha yaryar iyo xanaaneynta Ilmaha. Sanadkoo dhan, 5 beri isbuucii.

**Barnaamijyada imaanshaha Guruga**
waxaa la bixiyaa sanadkii oo dhan isbuucii 90-120 daqiiqadood, booqashada gurga iyo isdhaxgalka bulshada oo la qabto bishii 2 mar.

# SU'AALO? CIDDII LA WICI LAHAA

**Soo wac xafiiskeena weyn 320-253-8110 hadii aad wax su'aal ah qabtid ama walaac ku saabsan**

**Maamulka:**
Agaasimaha Fulinta, Jill Eickhoff

**Fasalka ama Tacliinta:**
*Isku-duwayaasha waxbarashada Dhalaanka*

- Martina Juvera-Paul
- Amy Korbel
- Heidi Larson

**Khayraadka Bulshada:**
*Isuduwaha Hawlgelinta Qoysaska,*
Suzy Amundson

**Naafada:**
Isuduwaha Naafada
Heidi Larson

**Diiwaangelinta ama Tashkiilinta:**
Ku taqasusaha Farsamada ERSEA, Jody Dirckx
*Isuduwaha Diiwaangelinta,* Suzy Amundson.

**Howlgeliyaha Qoyska:**
*ISuduwaha Howlgeliyaha Qoyska,*
Suzy Amundson

**Khabiirka Taakuleynta Barnaamijyada Kheyraadka iyo Shaqaalaha:** Maghan Larson.

**Lacagaha waalidiinta isku kooxda ah:**
*Xisaab Bixiyaha,* Aleesha Zins-Habstritt

**Caafimaad:**
Isuduwaha Caafimaadla iyo Nafaqeynta, Briana Hollis, RD LD

**Xanaanada:**
Isuduwaha Diiwaangelinta, Suzy Amundson

**Caafimaadka Maskaxda/Dabeecada:**
*Khabiirka Dabeecadda, Jennie Tiemens*
*Khabiirka Dabeecadda, Katie Gerdets*

**Nafaqada:**
*Isuduwaha Caafimaadka iyo Nafaqeynta,*
Briana Hollis, RD LD

**Afka Soomaaliga iyo xiriirka Dhaqanka:**
*Hagaha Dhaqanka,* Asli Mohamed

**MA JECLAAN LAHAYD INAAD KA MID NOQOTO GUDDIGA LA-TALINTA CAAFIMAADKA IYO DHIMIRKA?**

soo wac xafiiskeena weyn oo waydii **Briana Hollis!**

## IMAASHAHA IYO NIDAAMKA GAADIIDKA

**Joogteynta imaanshaha waa wax looga baahanyahey dhamaan caruurta Early Head Start iyo Head Start.**

- Daraasaduhu waxey muujinaayaan markey caruurtu yimaadaan iskoolka 85% iyo wixii ka sareeya ay Ku fiicnaadaan waxbarashadooda danbe sida Dugsiga sare.
- Reach-Up Head Start waxey idin weydiineysaa inaad Ku dadaashaan keenista ilmihiina iskoolka markii la isku celceliyo tahey 85% ama ka badan.
- Waalidiintu waxaa la siin doonaa macluumaad kusaabsan celceliska imaanshaha ilmahahiina maalin kasta oo aad ka heli doontaan macalinka, guriga idiinkugu imaado, ama u doodaha qoyskaaga inta uu socdo barnaamijka.

**Markuusan Ilmahaagu imaaneynin:**

- Soo wac, fariin soo qor, ama isticmaal TS App si aad ula soo xiriirto fasalka intuusan iskuulku bilaaban.
- Hadii ilmahaagu guriga loogu imaado ama waxbarashada guriga lagu siiyo, soo wac, fariin soo qor ama iimayl u soo dir macalinkaaga guriga kuugu yimaado ama xafiiska Reach-Up.
  Inta uusan macalinka guriga imaan kana soo wac lambarkaan 320-253-8110.

**Keenida iyo qaadida**

Qoysaska ayaa masuul ka ah keenista iyo ka qaadida ilmahooda iskuulka.

- Shaqaalaha kama jawaabi doonaan ama ma furidoonaan albaabka ilaa laga gaaro waqtiga keenista ama qaadida ee cunuggaaga falakiisa.
- Waa inaad ilmahaaga keentaa qaadataana waqtigii loo asteeyey. In hore lookeeno ama waqti dambe lakeeno waa waxaan la aqabaleynin.
- Hadii aad 15 daqiiqo ka soo daahdo xiligii qaadista shaqaalaha Reach-Up waxey wici doonaan dadka xiriirka deg deg ah sidoo kale markey 30 daqiiqo ka soo wareegto Waxeynu wici doonaa sharci fuliyaasha laguna war gelindoonaa in ilmahaaga aad "dayacdey".
- Markaad imaaneysid fasalka, Reach Up waxey rabtaa inaan caruur looga soo tegin gaariga dhaxdiisa ama lagu soo cidleyn. Hadii ilmo lagu cidleeyo gaariga waxaa la wici doonaa sharci fuliyaasha.
- Gaariga waa inuu dansan yahey furahana aad wadataa markii aad ka tageysid gaarigaaga.
- Iska hubi inaad fiiriso calaamadaha kuu sheegaya baarking maha sidoo kale; Goobta rarida ama baarkingka naafada,
- Waa inaad ilmahaaga gacanta ka qabataa ilaa aad ka keento fasalkiisa.
- Reach-Up waxey kaliya u ogolaan doontaa iney ilmahaaga u dhiibto dadka ku qoran xiriirka liiska deg dega ah (Emergency Contact list) la cala hadii ay xaalad deg deg ah dhacdo, qofka ilmahaaga qaadayo waa inuu ku jiraa liiska xaalada deg dega.
- **<u>Ilmahaaga gacanta qabo</u>** markii aad dhax lugeyneysaan Goobaha mashquulka ah baabuurtana marayaan. Caawi ilmahaaga oo bar amaanka.

**Soo Daahitaanka:** Ilmaha waxaa la keenayaa inta lagu gudo jiro 15 ka daqiiqo hore ee intuusan iskuulka bilaaban. Albaabada ayaa la xiri doonaa waqtiga ay xiisada bilaabato. Hadii aad soo daaheyso, waa inaad la soo socadsiisaa macalinka si aad u ogaato abraaca keenista. Caruurta waxey soo gelikaraan fasalka iyagoo haysta cudurdaar balamo sida warqad caafimaad ama WIC.

- **Soo daahida la xiriirto marxalad caafimaad:** Tani waxey dalbeysaa in dhaqtarka laga keeno fariin hadii ilmaha lagu soo celinayo iskuulka. Tani waxaa la socon karto dekumantiyo sida, baaritaan guud, xasaasiyad, ama xanuuno kale ilmuhu wajahayo laakiin aanan intaa kaliya ku ekeyn. Habmaamuuska xanuun walbo oo lagu qeexey buug gacameedka waalidka waa la raaci doonaa.

- Hadii qof yimaado Head Start isagoo weli xanuunsan, guriga ayaa loo diri doonaa.
- Qoys walba waxeynu weydiineynaa iney u soo gudbiyaan Reach-Up meeshii lagala soo xiriiri lahaa sida iimeelka saxda ah, cinwaanka iyo telefooka.
- **Si ay fasaladeenu u furnaadaan qof walbaa waa inuu raacaa hababka badbaadada, ama waxaa nalagu qasbi doonaa ineynu xirno fasaladeena oo aynu u bixino adeegyada qaab (virtual format) taasoo ah qaab maqal iyo muuqaal leh.**

## DHIGISTA

- Qoysaska ayaa la soo lugeyndoono ilmahooda iyagoo gacanta haya ilaa albaabka.
- **Dhamaan baabuurta waa iney dansanyihiin furahana hor u sii qaadataan** markaad ilmaha keeneysaan fasalka.



## QAADISTA

- Cidkastoo ilmaha qaadeysa waa iney ku jiraan dadka liiska xaalada deg dega ah sidoo kalena ay wataan aqoonsi (ID)
- Gaarigaaga waa inuu dansan yahey furahana aad heysataa intaad ilmahaaga ku xireysid kurisga gaariga.
- Qoysaska ayaa ilmahooda gacanta qabandoono markii ay gaarigooda dib ugu laabanayaan.

# Xeerarka iyo Shuruucda Xarunta Xannaanada Carruurta

**Reach-Up Head Start waxay leedahay 3 xarumood oo bixiya xannaanada carruurta oo maalinta la dheereeyey. Waalidiinta shaqeeya 30 saacadood toddobaadkii ama dhigta iskool ama jaamacad waqti-buuxa, isla markaana u baahan waqti dheeraad ah oo ka baxsan 7-da saacadood ee barnaamijka maalintii, waxay lacag ka bixin karaan xannaanada carruurta ee la bixiyo ka hor iyo ka dib saacadaha Head Start.**

**Boosasku waa xaddidan yihiin: 2 dhallaan, 6 carruur socod-barad ah, iyo 26 carruur ah oo dhigata fasalka ka hor dugsiga (preschool).**

**Fasallada Head Start iyo Early Head Start waxay furan yihiin 7:30 subaxnimo ilaa 5:00 galabnimo. Carruurta waxaa laga rabaa inay maalin kasta xaadiraan 8:00 subaxnimo ilaa 3:00 galabnimo, waana waqti bilaash ah.**

**Saacadaha 7:30 subaxnimo ilaa 8:00 subaxnimo iyo 3:00 galabnimo ilaa 5:00 galabnimo waa waqtiyada xannaanada carruurta ee lacagta laga bixiyo.**

**LACAG BIXINTA XANAANDA CARRUURTA:**

- QIIMAHA XANNAANADA CARRUURTA WAXAA LOO XISAABIN DOONAA MAALINKASTA OO AY XARUNTU FURAN TAHAY.

ILMAHA SADAX JIRKA AH IYO KA WEYN (HEAD START)- WAA $21/MAALINTII DHALAANKA YAR YAR (EARLY HEAD START)- WAA $25/MAALINTII

1. LACAG-BIXINTA UGU HORREYSA EE BILOWGA SANNAD-DUGSIYEEDKA WAA IN LA BIXIYAA HAL TODDOBAAD KA HOR INTA UUSAN ILMUHU BILAABIN XANNAANADA CARRUURTA. WAALIDIINTA WAXAA LA SIIN DOONAA BIILKA MARKA AY LA DHAMMAYSTIRAAN HESHIISKA BARNAAMIJKA XANNAANADA CARRUURTA U-DOODAHA QOYSKA (FAMILY ADVOCATE).
2. QOYSASKA BARNAAMIJKA DIB UGU SOO LAABANAYA WAA INAY BIXIYAAN LACAGTA UGU HORREYSA UGU DAMBAYN MAALINTA KULANKA FURITAANKA (OPEN HOUSE), KA HOR BILOWGA SANNAD-BARNAAMIJEEDKA CUSUB.
3.

- LACAGTA WAA IN LA SII BIXIYAA KA HOR INTA AAN LA HELIN ADEEGYADA XANNAANADA CARRUURTA. LACAGTA WAA IN LA BIXIYAA UGU DAMBAYN ARBACADA 10:00 SUBAXNIMO, TODDOBAADKA KA HORREEYA TODDOBAADKA ADEEGGA. HADDII LACAGTA AAN WAQTIGEEDA LAGU BIXIN, ILMAHAAGU MA IMAAN KARO XANNAANADA CARRUURTA TODDOBAADKA XIGA.

- LACAGAHA TODDOBAADLAHA AH IYO KHIDMADAHA KALE WAXAA LAGU BIXIN KARAA JEEG (CHECK), MONEY ORDER, AMA VENMO. FADLAN LACAG-BIXINTA KU QOR MAGACA ILMAHAAGA, SIDOO KALENA CADDEE HADDII LACAGTU TAHAY LACAGTA XANNAANADA CARRUURTA AMA KHIDMAD DIB-U-DHAC AH.
- LACAGTA UGU YAR EE LAGU BIXIN KARO VENMO WAA $5.00 AMA KA BADAN. LACAG KASTA OO KA YAR $5.00 WAA IN LAGU BIXIYAA HAB KALE OO LACAG-BIXINEED OO KOR KU XUSAN.
- BIILKA SAACADAHA XANNAANADA ILMAHAAGA WAXAA LAGU SIIN DOONAA ISNIINTA KA HORREYSA TODDOBAADKA ADEEGGA. HADDII XANNAANADA CARRUURTU XIRAN TAHAY ISNIINTA, BIILKA WAXAA LAGU SIIN KARAA MAALINTA UGU HORREYSA EE FASALKA.
- LACAGTA WAA IN LAGU BIXIYAA XAFIISKA WEYN EE REACH-UP HEAD START SUBAXNIMADA ARBACADA EE TODDOBAADKA BIILKA LAGU SIIYEY, SI ILMAHAAGU U HELO ADEEGGA XANNAANADA CARRUURTA TODDOBAADKA XIGA.

**KA DAAHIDA QAADISTA CARRUURTA: LACAGTA GANAAXA AH (LATE FEE)**

HADDII AAD ILMAHAAGA KA SOO DAAHDO WAQTIGA XIRITAANKA EE 5:00 GALABNIMO, REACH-UP WAXAY KAA QAADI DOONTAA $15 ILMO KASTA, 10-KII DAQIIQO KASTA EE AAD SOO DAAHDO.
LACAGTAN WAA IN LA BIXIYO KA HOR INTA UUSAN ILMAHAAGU DIB UGU SOO LAABAN FASALKA.
FADLAN MARKA AAD BIXINAYSO LACAGTA:

- KU QOR MAGACA ILMAHAAGA.
- CADDEE IN LACAGTU TAHAY GANAAXA SOO DAAHISTA (LATE FEE).

**JEEGGA DIB U SOO NOQDA LACAGTIISA (RETURNED CHECK FEE)**

QOYSASKA WAXAA LAGA DOONAYAA INAY BIXIYAAN LACAGTA BANGIGU KA QAADO REACH-UP MARKA JEEG LA BIXIYAY UU NOQDO MID AAN LACAG KU FILNAYN (NON-SUFFICIENT FUNDS – NSF). SIDOO KALE, WAA INAY DIB U BIXIYAAN LACAGTII JEEGGA KU QORNEYD EE AAN LA BIXIN KARIN.
HADDII ARRINTAN AY DHACDO MAR LABAAD, REACH-UP MA AQBALI DOONTO JEEGAG SHAQSIYEED (PERSONAL CHECKS) MUSTAQBALKA. WAXAA MARKAAS LAGA DOONAYAA QOYSKA INUU ISTICMAALO HAB KALE OO LACAG-BIXIN AH OO REACH-UP OGGOSHAHAY.

**KAALMADA KHARASHKA XANNAANADA CARRUURTA (CHILD CARE ASSISTANCE), DEEQAHA (GRANTS), IYO DEEQAHA WAXBARASHO (SCHOLARSHIPS)**

- QOYSASKU WAA INAY SII WADAAN BIXINTA LACAGTA TODDOBAADLAHA AH ILAA REACH-UP AY HESHO HESHIIS QORAAL AH OO KA YIMID DEGMADA (COUNTY) AMA HAY'ADDA KALE EE BIXISA KAALMADA, KAAS OO CADDEYNAYA IN QOYSKU U QALMO KAALMADA. MARKA TAAS LA HELO, QOYSKU WUXUU BIXIN DOONAA OO KELIYA LACAGTA WADA-BIXINTA (CO-PAY) LABADII TODDOBAADBA MAR (BIWEEKLY), HADDII AY JIRTO.
- JEEGAGGA LACAG-CELINTA (REIMBURSEMENT) WAXAA LAGU QORI DOONAA QOFKII BIXIYAY KHARASHKA XANNAANADA CARRUURTA.
- BARNAAMIJKA CHILD CARE ASSISTANCE IYO DEEQDA PATHWAY 1 WAXAY DABOOLAAN OO KELIYA 25 MAALMOOD OO MAQNAANSHO XANUUN AH.
- HADDII AADAN REACH-UP HEAD START KU WARGELIN SABABTA UU ILMAHAAGU UGA MAQNAA FASALKA MAALINTAAS, REACH-UP WAXAY U QAADAN DOONTAA IN ILMAHAAGU XANUUNSANAA, MAALINTAASNA WAXAA LAGA TIRIN DOONAA 25-KA MAALMOOD EE XANUUNKA EE AY DABOOLAAN CHILD CARE ASSISTANCE AMA PATHWAY 1.

- QOYSASKA QAATA CHILD CARE ASSISTANCE EE DEGMADA AMA DEEQDA PATHWAY 1 WAXAY XAQ U LEEYIHIIN 25 MAALMOOD OO KELIYA OO MAQNAANSHO AH INTA LAGU JIRO MUDDADA UU SOCDO BARNAAMIJKA:
- COUNTY CHILD CARE ASSISTANCE: JANAAYO 1 ILAA DISEEMBAR 31 DEEDA
- PATHWAY 1: LUULYO 1 ILAA JUUN 30 KEEDA
- HADDII ILMAHAAGU MAQNAADO IN KA BADAN 25 MAALMOOD, WAALIDKA AMA MASUULKA AYAA MAS'UUL KA NOQONAYA BIXINTA KHARASHKA MAALMAHA DHEERAADKA AH EE AANAY DABOOLIN CHILD CARE ASSISTANCE AMA PATHWAY 1.

- HADDII AAD KU GUULDAREYSATO BIXINTA LACAGAHA XANNAANADA CARRUURTA EE LAGAA RABO, REACH-UP WAXAY U GUDBIN KARTAA HAY'ADDA URURINTA DEYNTA (COLLECTION AGENCY) MACLUUMAADKA LAGAMA MAARMAANKA U AH URURINTA DEYNTA, OO AY KU JIRAAN:
- MAGACA(YAASHA)
- CINWAANKA
- TAARIIKHDA DHALASHADA
- MACLUUMAADKA SHAQADA
- MACLUUMAADKAN WAXAA LA WADAAGI DOONAA SI LOOGU URURIYO LACAGAHA LAGUGU LEEYAHAY REACH-UP.

**Dabaaldegyada**

- Reach-Up Head Start waxey ixtriraam dareen leh u heysaa dhamaan qoysaska ay u adeegto waxey aaminsanyihiin, dhaqanka, iyo diintaba.
- Fasalada ma qaban doonaan ama uma dabaal degidoonaan ciidaha.
- Dabaaldegyada aynu qabano waa cunugaaga dhalashadiisa. Macalimiinta waxey si gaara ugu sharfaan ilmaha maalintaas noocya kala duwan iyadoo ay tahey maalin ku weyn ilmaha. Fadlan la xiriir macalinkaaga lana wadaag qaabkii ilmahaaga loogu dabaaldegi Lahaa dhalashadiisa taasoo aanan la socon wax raashin ah.
- Wax raashin ah fasalada lama keeni karo.

**Fasalka iyo xayawaanka**

Reach-Up Head Start uma ogolo in fasalada la keeno xayawaan shaqaalaha looma ogolo iney keenaan xayawaan fasalada ama booqashada guryaha ama barnaamijka isdhaxgalka bulshada



## Shirarka iyo Booqashada guriga

- Macalinkaaga ayaa kuu soo sheegi doono jedwalka imaanshaha dheeraadka ah ee guriga, labo kulan iyo booqashada ugu danbeyso ee imaanshaha guriga.
- Kulumadaan waxey ku siinayaan fursado aad ilmahaaga hiiksigiisa isla meel dhigtaan sidoo kalena aad ogaato isbedelada horumarka ilmahaaga.

## Ku Ciyaarida banaanka

- Ciyaarta banaanka waa u muhiim ilmahaaga caafimaadkiisa iyo koriimadiisa.
- Shaqaalaha maalinwalba ilmaha banaankey geeyaan, tilmaamaha cimilada xanaanada caruurta ayaa ilaalin doonto qabowga ba'an markuu jiro.
- Fadlan u keen ilmahaaga dhar ku habboon cimilada.

## Baaritaan

- Hadii uusan ilmahaaga marin baaritaanka caafimaad ee caruurnimada ay bixiyaan iskuulka degmada

Reach-Up Inc. ayaa baaritaanka caafimaad marsiineyso ilmahaaga. Baaritaanka waxaa ka midah guud ahaan korniimada, maqalka, aragga, dhererka iyo culeyska.

- Hadii uu jiro wax welwel ah waa lagula soo socodsiinayaa.

**Waxbarashada Daryeelaha/Shirarka/Iskaashiga Qoyska:**

- Reach-Up waxey wadi doontaa bixinta fursadaha waalidiinta,kulumada waalidka ee xarunta, Gollaha siyaasada iyo booqashada hishiiska iskaashiga ee qoyska.
- Markey booqashada qof ahaan u dhici karin,Reach-Up shaqaalaheeda waxey isticmaali doonaan TEAMS ama Zoom ka oo uu kulnka ka dhicidoono.
- Xogta waxaa lagu soo diri doonaa qoysaska iimeelkooda si ay u saxiixaan qeybna uga noqdaan dhacdooyinka ama barnaamijyada.
- Heshiiska iskaashiga qoyska isu imaanshaha shaqaalaha ayaa ku dhameystiri doono guriga qoyska. Hadii markaa xaalad kale kirto shaqaalaha wey ku dhameystri karaan qaabab kale sida Zoom ka ama telefoonka.

- **Gollaha Siyaasada:** waa koox waalidiin ah oo ay soo doorteen kooxdaada waalidiinta ah, kuwaas oo mateli doona barnaamijyada ilmahaaga kuwaasoo go'aamo ka gaarayaan sida ay Raech-Up barnaamiya deeda ay u fuliso. Waxey bishiiba mar la kulmaan agaasimaha fulinta iyadoo uu u dulmaraayo maaliyada, siyaasada, iyo wixii markaas ka dhex socda barnaamijyada.

- **Fursadaha hoggaaminta:**sii taageero joogto ah kooxdaada waalidka ah sida gudoomiyaha, khasnajiga, iyo xoghayaha goobtaada kulanka waalidka.

# HAWADA XUN

## Xarunta Barnaamijyada (home base)

- Hadii uu iskuulka degmadaadu la xiro Hawada oo xumaato awgeed, Xarunta Fasalka ilmahaagu dhigto ma jiridoono.
- Hadii iskuulka degmada 2 saac ka dibdhaco bilaawashidiisii Hawada oo xun awageed, fasalada maalintii oo dhan la dhigi doono iyagana 2 saac ayeey Dib u dhici doonaan.
- Hadii la xiro Xarunta Head Start loona xiro hawadoo xun awgeed Waxaa ogeysiinta la soo dhigi doonaa WCCO TV-Channel 4.
- Reach-Up Head Start Fariimaha baajinta Waxey qoysaska ugu dirtaa email, qoraal teleefoonka ah , iyo/ama
- wicitaan telefoon oo  xambaarsan fariimo otomaatig ah.
- Reach-Up waxey casharadeeda ku bixin doontaa maqal iyo muuqaalka fog oo kala doorasho ah. Markii ay fasalada xiran yihiin hawada oo xun awgeed.

- ***Ugu danbeyn, waalidiinta iyo dadka masuulka ah*

*Waa iney go'aan ka ugu dambeeyo ka qaataan hadii Ilmuhu imaanayo iskuulka intii Hawada xun lagu jiro.***

## Barnaamijyada guryaha:

- Reach-Up waxey dirtaa Fariimaha baajinta oo sheegaya Hawada xun taasoo la adeegsanayo email, fariin wicitaan telefoon iyo fariin iswada oo la socoto (automated message)
- Reach-Up waxey casharadeeda ku bixin doontaa maqal iyo muuqaalka fog oo kala doorasho ah. Markii ay macalimiinta guryaha ku dhiga imaan karin hawada xun awgeed.



# WARBIXIN MUHIIM AH OO KU SAABSAN...

**Fursadaha waxbarashada dadka waaweyn**

- Reach-Up Head Start waxey taageereysaa yoolka aad rabtid inaad ka gaarto GED, Shahaadada Dugsiga sare, ama kor u qaadida xirafadaada luuqada Ingiriiska taasoo dhigashada fasalada ESL Barnaamijyada hoos kutaxan:
  - Waxbarashda Aasaasiga ha ee Dadka waaweyn
    - Inta badan degmooyinka iskuuladooda wey bixiyaan fasalada waxbarashda hoose ee dadka waaweyn (ABE) iyo sidoo kale fasalada barashada luuqada Ingiriiska (ESL). La soo xiriir Taageeraha qoyska, macalinka guryaha, ama macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan arintaan kala soo xiriir khabiirka barnaamijka iyo khayraadka aadanaha ee xafiiskeena weyn .
    - Reach-Up Head Start waxey dib kugu soo celin kartaa qarashkii kugu baxey imtixaanka GED ga
    - Reach-Up Head Start can provide reimbursement for the cost of your GED test.

**Qabiir kobcineed oo loo maraayo tababarid**

- Yoolkeena ugu weyn waa waxbarashada iyo daryeelida ilmahaaga. Sida laga soo xigtey Head Start heerarkeeda wax qabad , Reach-Up waxey shaqaalaha siineysaa tababarid aqooneed. Tababarida waxey u dhaxeysaa tababaraha iyo shaqaalaha taasoo loo maraayo habab kala duwan oo ku saleysan tababarid qabiir kobcineed leh. Hadafka tababaridu waa kor u qaadida xirfaddihii ay macalimiintu hore u dhigayeen. Sida aynu wax barashadu ugu heyno boos beynu ugu heynaa korniimada.
- Hadii aad wax su'aal ah aad qabto oo la xiriira tababarida la siiyey ilmahaaga macalinkiisa ama macalinka guriga kuugu yimaado fadlan xor ayaad u tahey inaad la soo xiriirto: Martina Juvera-Paul; Isuduwaha horumarinta waxbarashada iyo xirfadlaha kana soo wac lambarkaan 320-253-8110.

**Ilaha makdabadda**

- Reach-Up Head Start waxey aaminsantahey in aqrinta ay muhiim u tahey ilmahaaga iyo qoyskaagaba! Fiiri macluumaadka diyaarka kuu ah oo aad heli kartaan:
  - Makdabada Caruurta
    - Xarunta Bilowga hore iyo barnaamijyada guryaha ku saleysan waxey leeyihiin Makdabad buuggaag taasoo diyaar u ah ilmahaaga oo ay u qaadan karaan guriga.
    - Maalin walba daqiiqado sii ilmahaaga oo aad buug ugu aqriso.
    - Caawi oo xasuusi ilmahaaga iney soo celiyaan buuggaagta makdabadda.
  - Habeenka Makdabada
    - Ilmahaaga Head Start ka ah iyo Early Head Start ka kooxaha waalidiinta waxaa la idinku boorinaayaa inaad abaabushaan booqasho makdabadda nawaaxigiina.
    - Si qoysaska iyo Ilmaha ay u bartaan Howlaha bilaashka ah ee ay bixiso makdabadda dadweynaha.
    - Reach-Up Head Start waxey bixineysaa buuggaag bilaash ah iyo talooyin fudud oo aqriska ah oo ilmahaagu guriga u isticmaali doono.



# CAAFIMAAD

**Shilalka/ Dhaawacyada:**

- Hadii ilmahaagu dhaawac gaaro ama u baahdo daryeel caafimaad:
    - Shaqaalaha ayaa markiiba ku soo wacaayo. Hadii lagu heliwaayo waxeynu waceynaa Gargaarka deg deg ah.
    - Shaqaalaha waxey sii siinayaan Gargaar deg deg ah, hadii loo baahdo ambalaasna waa la wacayaa.
    - Waxaa lagu siin doonaa warbixin qoraal ah.

**Dhiqlaha ama caabuqyo lamidah (saldhiga guriga):**

- Fadlan wac macalinka guriga kuugu yimaado hadii aad la kulmeysid cayayaanka guriga sida dhiqlaha. qabanqaabada isu imaanshaha waxey ka dhici doontaa meelkale.

**Ogeysiisyada Cudurrada lakala qaado:**

- Macalimiinta ayaa idin soo diri doono ogeysiin hadii uu ilmahaagu la kulmo Cudurada lakala qaado. Ogeysiinta waxaa laguu soo dirayaa isla maalintaa oo warbixintu xanuunku la gudbiyo.
- Hadii dhaqtarkaaga ku yiraahdo cunugaaga wuxuu qabaa xanuunada lakala qaado la soo socodsii Reach-Up Head Start 24 saac gudahooda (Kuma jiraan maalmaha fasaxyada ama ciidaha) soo wac *320-253-8110*.

**Talaalada, Baaritaanka jirka iyo ilkaha:**

Ka mid noqoshada Early Head Start ama Head Start ilmahaagu waa in uu heystaa:

- Talaalada loo baahan yahey oo ku saleysan ilmaha dadiisa
- Baaritaanka jirka
- Baaritaanka ilkaha



**Daawooyinka:**

Hadii ilmahaagu u baahan yahey daawo intuu iskuulka joogo:

- La soo xiriir isu duwaha adeegyada caafimaadka iyo nafaqeynta Briana Hollis ee Reach-Up Head Start ka soo wac 320-253-8110.
- Dhaqtarkaaga/dhaqtarka ilkaha ha soo buuxiyo arjiga daawada.
- Dhamaan Daawooyinka waa iney ku jiraan weelkii ay asal ahaan ku timaadey.
- waa inaad dhamaan Daawooyinka u keentaa isu duwaha adeegyada caafimaadka iyo nafaqeynta. DAAWOOYINKA HAKU SOO RIDIN BOORSADA ILMAHA.
- Daawooyinka waxaa lagu xafidI doonaa meel ayan ilmuhu gaari karin.

**Daawooyinka aanan u baahneyn in dhaqtar qoro ee dhalaanka/socod baradka:**

Reach-Up Head Start waxey bixisaa, dheebar, masaxa ilmaha, difaaca qoraxda, buraashka ilkaha /faashada afka lagu tirtiro iyo daawada lagu cadeydo oo wax qarasha uga baxeyn waalidka.

**Nidaamka badbaadada hurdada:**

Barnaamijyada Daryeelka dhalaanka, Reach-Up Head Start waxey tix raacdaa talooyinka akadheemiyada mareykanka ee dhaqaatriirta caruurata ee meel hurdada ku nabdoon. Waalidiinta waxaa laga codsanayaa iney raacaan tababarada hurdada nabdoon.

**Daryeelka jirada:**

Hadii ilmahaaga iskuulka ku xanuunsado:

- Ilmahaagu waa la ilaalinayaa isagoo laga fogeynayo ilmaha kale.
- Macalinka ayaa ku soo wacayo si aad ilmahaaga u kaxeysato. Hadii lagu heli waayo ama ilmahaaga soo doonin 30 daqiiqo gudahooda, waxaa la wacayaa dadka xiriirka deg dega ah.

**Tijaawada Biyaha oo laga fiirinayo inta fluoride ku jirto:**

Hadii aad ceel kuu gaar ah leedahey, Reach-Up Head Start waxey Biyaha tijaawadooda u direysaa sheybaarka si loo ogaado inta fluoride ku jirto. Reach-Up jawaabta waxey u direysaa dhaqtarkaaga ilkaha ama dhaqtarkaaga guud.

# HABDHAQANKA & CAAFIMAADKA MASKAXDA

**Caafimaadka maskaxda waa caafimaadka bulshada iyo horumarka dareenka. waana udub dhexaadka waxbarashada oo dhan.**

**Siyaasada Hagida habdhaqanka fasalada:**

- Reach-Up Head Start waxey kor u qaadaa isticmaalka habab xaqiiqsan taasoo ku saleysan habdhaqano wanaagsan kuwaasoo kuwada aadan dhamaan ardeyda..
- Macalimiinta waa la tababarey waxaana lagu tababarey qaabka ugu habboon ay jawaab waafiya uga bixin lahaayeen caruurta yar yar hab dhaqankooda.  caruurtaas oo weli u koraayo qaabab kala duwan dareenkooduna u muujinaayaan qaabab kala duwan. Kuwaasoo u baahan waqti ay wax ku bartaan kuna dhaqmaan.
- Waalidiinta waxey soo codsan karaan nuqul ka mid ah siyaasada dhaqanka iyo habraacyada iyagoo soo weydiinayaan nuqul ka mid ah dokomindiyada xeerka 3 xaad

**Adeegyada Caafimaadka dhimirka/Habdhaqanka:**

- Kooxda caafimaadka dhimirka waxey caawimaad siiyaan macalimiinta iyo caruurta fasalada dhexdooda iyo guryahaba.  Hadii ilmuhu ku adagtahey (tusaale: xanaaqa, raacida tilmaamaha, is dejinta, kala guurka, wadaaga, ama iney gacmahooda isku koobaan) kooxda caafimaadka maskaxda ayaa u kuurgeli karaan lana kulmaayo shaqaalaha iyo qoyska. Si wadajir ah ayeey uga wada hadli doonaan qaababkii taageero loogu fidin Lahaa si ilmaha, qoyska iyo fasalkaba loo caawiyo, loona baro xirfad cusub oo ku dheehan horumar.
- Sidoo kale kooxda caafimaadka dhimirka waxey fasal walba booqanayaan dhoor mar sandkii. Intii halkaa la joogo waxaa loo kuurgeli doonaa fasalka iyo caruurta, sidoo kale waxaa caruurta la siindoonaa cashar ku saabsan shucuurta bulshada. Waalidiinta waxaa guryaha loogu diri doonaa waraaqo lagula wadaagayo wixii maalintaa lagu barey iskuulka.
- Ayadoo qeyb ka midah kooxda caafimaadka dhimirka, Reach-Up waxey shaqaaleysiisey afar kamidah u gargaarayaal caafimaadka dhimirka iyo hab dhaqanka kuwaasoo si toos ah ula shaqeeyaan shaqaalaha fasalada si ay caawimaad ula garab istaagaan caruurta iyo qoysaska.
- Sidoo kale, kooxda caafimaadka maskaxda waxey bixiyaan casharo ku saabsan waalidnimada sanadkii oo dhan. Casharadani waxaa lagu bixin karaa iyadoo loo maraayo fasalada (conscious Discipline) edbinta miyirka ku dheehan xiliyada kulumada waalidiinta ama isdhaxgalka bulshada.
- Hadii aad wax welwel aad ka qabto ilmahaaga koriimadiisa ama hab dhaqankiisa, fadlan si toos ah ula soo xiriir mid kamid ah kooxdeena habdhaqanka  adigoo soo wacaya xafiiskeena weyn 320-253-8110 ama la soo hadal ilmahaaga macalinkiisa ama macalinka guryaha yimaado.

# ADEEGYADA NAAFADA

- Iskuulada degmooyinka ama rugaha caafimaadka iyaga ayaa kuu sheegi karaan hadii ilmahaagu naafo yahey.
- Reach-Up Head start shaqaalaheeda waxey la shaqeeyaan Iskuulada ama rugaha caafimaadka shaqaalaha waxey ilmahaaga siinayaan waayo aragnimada ugu wanaagsan ee xanaanada caruurta.
- Aragtidaada waalidnimo qeyb muhiim ah ayeey ka tahey ilmahaaga wax barashadiisa.

**Head Start kadib waxaa ku xigo...**

## ADEEGYADA KALAWAREEGA EE XANAANADA!

**Reach-Up adeegyadeedu u gudbinta xanaanada waxey ilmahaaga ka caawinayaan in si wacan loogu wareejiyo xanaanada**

**Adeegyada u gudbinta xanaanada shaqaalaha ayaa kula soo socodsiina yaan:**

- wixii macluumaad cusub oo loo baahanyahey xaga waraaqadaha xanaanada:
  - Diiwaangelinta
  - Talaalada (immunizations)
  - Iyagaa wareejindoono si waafaqsan shaacinta macluumaadka aqoonsiga qofka taasoo laga heli karo Reach-Up Head Start website kooda www.reachupinc.org.

- U doodaha qoyskaaga ama macalinka guriga idiinku yimaado ayaa idiin imaandoon ka hor intaan xanaanada la bilaabin si ay idinla wadaagaan:
  - Warbixinta iskuulka
  - Macluumaadka illaha bulshada
  - Iskuul hawleedka oo aad ilmahaaga kala shaqeyn doontid.

**Taakuleynta deegyada qayb kamid ah waxaa maalgelisey United Way of Central Minnesota!**



# NAFAQADA

Early Head Start iyo Head Start, Ilmahaaga waxaa la siindoonaa cunto caafimaad leh iyo casaryo. Reach-Up waxey ka qeyb qaadataa oo raacdaa qaababka ay cuntada u dejiyaan Barnaamijka cuntada iyo xanaanada ilmaha iyo dadka waaweyn (the Child and Adult Care Food Program (CACFP)).
. Drinking water will be available to children throughout the hours of operation and offered at frequent intervals in single service drinking cups.

**Kooxda Adeegyada Nafaqada waxey halkan diyaar idinku yihiin iney ku caawiyaan!**

**Hoos waxaad ka dheehan kartaa qeyb ka mid ah adeegyada aynu bixino:**

- Ilmahaaga dhererkiisa iyo culeyskiisa waxaa laga qaadi doonaa xiliga dayrta iyo gu'ga si loola socda korniimadiisa.
- Aqoon/warbixin ku saabsan Nafaqada oo loogu talagaley qoysaska (qorsheynta cuntada, Cunida waxaad caado u leedahey iyo/ama walwelka koritaanka, naasnuujinta, Daryeelka dhalmada ka hor, iwl.).
- Saldhigida cuntooyinka gaarka ah hadii loo baahdo.
- Qudbad jeediyaha shirarikiina waalidiinta ama dhexgalka bulshada (booqashada dukaamada raashinka, wax ku iibsashada miisaaniyada, karinta, qorsheynta cuntada, qaab nololeyd caafimaad leh).
- Farm to Head Start waxay taageertaa miraha iyo khudaarta gudaha lagu beero ee ku jira liiskeena cuntada iyo jardiinooyinka biyo-mareenka ah ee fasal kasta.

**Talooyin loogu talagaley Nafaqada wanaagsan ee Adiga iyo Qoyskaaga:**

- Sii 5 xabo oo Khudaar iyo miro ah maalin kasto.
- Ku goobaabi qoyskaada iney biyo badan cabaan, ugu yaraan 4 mar maalintii.
- Dooro hilibka aan baruurta laheyn, digaaga, kaluunka, digirta iyo misir, iyo digirta looga maarmo saliida xoolaha borotiinka leh.
- Xadid isticmaalka TV waxka yar 2 saac maalintii.
- Caawi ilmaha si uu u fir fircoonaado maalin walbo 1 saac.
- Yaree Cunida cuntada deg dega ah iyo Cuntooyinka diyaarsan sida (jibiska, nacnaca, sodhada, iwl.).
- Cab cabitaanada aan sokorta laheyn.

Iyadoo la raacaya sharciga federaalka xuquuqda madeniga ah iyo Waaxda Beeraha Mareykanka (USDA) xeerarka iyo siyaasada xuquuqda madeniga ah, USDA, da wakaaladeeda , xafiisyada, iyo shaqaalaha, iyo macadaha ka qeyb qaadanayo ama maamulayo USDA barnaamijyadeeda waa ka mamnuuc cusuriyeenta xaga midabka, jinsiyada, Dhalashada qofka meeshuu ka soo jeedo, jinsiyada, baahida gaarka ah, da'da, ama aargoosi ama aargoosiga Howlaha xuquuqda madeniga ka hor ama howsha ay qabato ama ay maalgeliso USDA da.
Dadka baahiyaha gaarka ah la nool u baahan bedel sida isgaarsiinta macluumaadka barnaamijka (e.g. qalabka indhoolaha, daawacad far weyn, cajalad maqal ah, Luuqada calaamadaha mareykanka, iwl.), waa iney la xiriiraan wakaalada (gobol ama deegaan) meesha ay ka buuxiyaan kaalmooyinka. Shaqsiyaadka dhagoola yaasha ah, maqalku ku adag yahay ama hadalka naafo ka ah waxey la xiriiri karaan USDA iyada oo loo maraayo Adeegyada gudbinta federaalka ee (800) 877-8339.waxaa intaas dheer, macluumaadka barnaamijka waxaa lagu diyaariyey luuqado kale ee aanan aheyn ingiriis.
Si aad u gudbiso ashtako takoor ah buuxi foomkaan, USDA Program Discrimination Complaint Form, (AD-3027) qatkana ka hel: http://www.ascr.usda.gov/complaint_filing_cust.html, iyo Cidkastoo ah xafiiska USDA , ama warqad soo qor oo ku soo hagaaji USDA warqadana soo raaci dhamaan aqbaartii aad gudbisey oo aad foomka ku cadeysey. Si aad u codsato foomka nuqulka cabashada, soo wac (866) 632-9992. Ku soo dir foomkaaga Cabashada ama warqada USDA ku hagaaji: (1) boostada : U.S. waaxda Beeraha ee Mareykanka , xafiiska kaaliyaha xoghayaha madeniga , 1400 Independence Avenue, SW, Washington, D.C. 20250-9410; (2) Fax: (202) 690-7442; or (3) Email: program.intake@usda.gov.

# NAASNUUJINTA

## Qoysaska ku soo dhowaada halkan!

Reach-Up Head Start iyo Early Head Start waxey taageertaa naasnuujinta maxaa yeeley wuxuu go'aan keenu yahey hooyooyin iyo caruur caafimaad qaba.

Si aynu u taageerno qoysaskeena naaska nuujinaayo ama tixgelinaayo naasnuujinta, waxeynu ku dadaaleynaa ineynu sameyno waxyaabaha soo socdo:

- Ogeysii muhiimada ay leedahey naasnuujinta.
- U tabobarida shaqaalaha si ay wax uga qabtaan, keydinta, iyo ku quudinta caanaha hooyada oo si wacan loo maareeyo.
- In la baro qoysaska qaabka ugu habboon oo caanaha loo dhigo iyo sida loo sumadeeyo caanahooda si xanaanada ay ugu isticmaalaan.
- In la siiyo goob ku habboon naasnuujinta, iyadoo aynu ku soo dhoweyneyno xafiiskeena weyn hooyooyinka naaska nuujinaayo dhalaankooda.
- Soo bandhigida boorarka taageeraayo naasnuujinta iyo tusida qaabka ugu wacan ee naasnuujinta.
- Ku tababarida dhamaan shaqaalaha si ay u taageeraan qaabka ugu wanaagsan ee dhalaanka iyo caruurta yaryar naasnuujin tooda.
